



## SUN waxay ka iftiimaysaa Woodlawn

Tiro badan oo ka mid ah dhalooyinka biyaha ee dib loo habeeyay ‘recycled’ ee “ubaxa” laga sameeyay ayaa ka soo lusha saqafka. Dhawaqa durbaanka baaldiga ‘bucket drums’ oo 20 ka kooban ayaa ka soo baxaya goobta wax lugu soo bandhigo ‘auditorium’. Carruurta ayaa qayliya iyaga oo ku faraxsan meesha biyuhu ka soo burqanayaan ‘fountain’ ee tijaabada sayniska ee Diet Coke.

Marnaba ma jiro waqtii laga xiiso dhaco Ma ji xerada ‘camp’ xagaaga la aado ee SUN ee ku taala dugsiga Woodlawn, halkaasi oo 40 ay ardayda fasallada labaad iyo sadexaad ay ku bartaan xisaabta, sayniska iyo akhriska/qoraalka—iyaga oo waxooga sawaxan ah ka sameeya—barnaamijkan kobcinta ee gaarka ah. Ardaydu waxay casharo ka helaan tiro ku dhawaad tiro badan oo macallimiin ah oo ka tirsan Woodlawn kuwaasi oo doortay in ay ka boodaan fasaxyadoodii xagaaga si ay uga qayb qaataan xerada ‘camp’.

“Macallimiintu si dhab ah ayay iskugu xirmeen si ay u taageeraan carruurta iyaga oo tusaaya in maalgelin lagu sameeyay,” ayay dhahday Lauren Lastrapes, oo ah maamulaha goobta Woodlawn SUN.

Inta lagu gudo jiro sanad dugsiyedka 2016-2017-ka, wax ka badan kala bar 300 arday oo dhigta Woodlawn ayaa ka qayb qaatay barnaamijka dugsiga ka dib ee SUN “SUN” waxay u taagan tagay “Mideynnta Dugsiyada Xaafadaha,” waana barnaamij ka qayb qaadashada dugsiga ka dhiga meel xaafadaha u dhixeyya isla markaana ay maamulaan Degaanka Multnomah, magaalada Portland, Latino Network iyo Self-Enhancement, Inc.

Qiyaasta sare ee ka qayb galka ardayga ee Woodlawn waxay markhaati u tahay saameynta SUN ay ku leedahay bulshada.

Macallimiinta xagaaga ayaa subax kasta ilaa hal saac dhiga fasallada xisaabta iyo akhriska/qoraalka iyada oo barnaamijka kooban ee toddobada usbuuc socdaa la arkay in uu leeyahay horumar waxbarasho oo muuqda.

Lionel Clegg, oo macalinka fasalka koowaad ka ah Woodlawn, ayaa bilowgii iyo dhammaadka xerada ‘camp’ qaaday imtixaanka aqoonta wax akhriska iyo xisaabta. Mid kasta oo ka mid ah ardaydiisa waxaa kordhay dhibcahiisa/buundadiisa; ardayada dhobicda/buundada ugu saraysaysa keentay bilowgii xagaagu waxay awooday in ay keento dhobicda/buundada ugu fiican ee imtixaankeeda xisaabta ee kama dambaysta ah, ardayga dhobicda/buundada ugu hooseysa keenay wuxuu arkay in dhibcihiisii/buundadiisu kordheen boqolkiiba 48 dhammaadkii xagaaga.

“Waxaan arkay daraasado la sameeyay oo lagu ogaaday in ardayda dhigata dugsiga hoose ay inta lagu jiro xagaaga lumiyaan boqolkiiba 46 aqoontii ay heleen sanad dugsiyedka,” ayay dhahday Lastrapes. “Carruurta timaada xerada SUN ma yeeshaan farqigaasi ku yimaada waxbarashada—qaar ka mid ah iyaga xataa waxay kordhiyaan horumarka sanad dugsiyedkooda.”

Subax dhawayd fasalladooda waxbarasho ka dib, ardaydu waxay ka qayb qaateen laba fasil oo midkiiba saacad socday oo dhanka kobcinta ah. Waxaa ka mid ahaa: wax karinta, naadiga STEAM, sayniska hawada, durmaanka baaldiga ‘bucket drumming’, saynis iyo wax beerid aan caadi ahayn.

Durmaanka baaldiga, Eddie Jackson wuxuu dadka u qaybiyya baaldiyo ‘buckets’ badan oo cad oo laga keenay dukaanka Lowe’s iyo tiro badan oo ah ulaha durmaanka ‘drum sticks’. Wuxuu kooxda geliyaa saf toosan iyaga oo kuraas ku fadhiya oo isaga ka soo horjeeda isla markaana wuxuu qabtaa cayaarta loo yaqaan “Simon Says.” Jackson wuxuu si fudud u garaacaa durmaanka, iyada oo ardayda ay ka daba garaacaan habka durmaanku u dhacayo.

Ka dib marka la tababarto, ardayda ayaa qofba mar sameeyaa isaga oo fasalka u hoggaaminaya cayaartooda u gaarka ah ee Simon Says.

#### [HALKAN DHAGEYSO]

Sayniska aan caadiga ahayn, ardayda ayaa ku soo urrura miiska u dhow beerta bulshada ee ka dambaysa dugsiga si ay iskugu dayaan in ay gacmahooda ku sameeyaan, ka dibna tijaabiyaan, aragtidooda ka dhiibtaan.

Miiska waxaa kor saaran dhalooyin hal litir ah oo ah Coke, Diet Coke iyo Sprite.

“Haddii aan shan nacnaca Mentos ku ridno dhalooyin kasta,” ayay dhahday Maryam Lowe, iyada oo kor u haysa nacnac si ay carruurtu u arkaan, “kee baa yeelanaya meesha biyuhu ka soo baxaan ‘fountain’ ee ugu dheer?”

Waxay ku dhawaqaan doorashadooda.

“Aynu aragno, markaa!” ayay dhahday Lowe. Waxay cantoobo ‘handful’ oo ah nacnaca Mentos ku ridaa dhalada u horaysa. Ardaydu way soo foorsadaan si ay u fiirsadaan, iyaga oo qaarka mid ahi xusulkooda kor saaraya miiska. Marka biyuhu ka soo burqadaan dhalada Sprite ku jiro, dib ayay isku leexiyaan iyaga oo yaaban, qaylinaya isla markaana sacabka tumaya.

Waxay diyaar u yihii dhalada labaad iyo ta saddexaad, iyaga oo boodboodaya isla markaana farxad la qaylinaya isla marka uu nacnaca Mentos dhalada ku dhex dhacdo.

#### [FIIDIYAH A HALKAN]

Maalinta dhammaadkeeda, macallimiinta, ardaydu way wada daalan yihii, laakiin waa kuwo faraxsan.

“Waxaan islahayn waxay noqon doontaa mid aad u fiican in carruurtu helaan hawlo dheeraad oo sayniska ku saleysan,” ayay dhahday Lastrape, “Qaar ka mid ah waxay u maleynayaan in aanay jeclayn sayniska. Laakiin halkan, waxaanu ku cadaadin karnaa in ay helaan khibrado cusub, waxayna arki karaan waxa ay jecel yihii in ay sameeyaan. Waxay ka tageen dugsiga SUN iyaga oo wax kororsaday.”

-Laura Hanson